

Idinka ayaa mahada iska leh inuu ubaxa

Majblomman taageeri karo carruuro badan

Lacagta la soo ururiyo waxaa loo qaybiyaa in lagu taageero carruurta gudaha waddanka deggan. Taageeradu waxay noqon kartaa waxyaabo inteena badani aynu u haysano in dadka oo dhami haystaan, tusaale ahaan dharka, kabbaha ama kharashka hawlaha xilliga firaaqada. Carruurta waxay ku iibin karaan ubaxayada majblommor boorso iyo dukaankooda internetka ama dukaanka webka oo keliya.

Sidee ayaa la sameeyaa si loo iibiyo ubaxyada majblommor?

1. Carruurta waxa la siinayaa kood kooxeed uu siinayo qofka masuulka ka ah iibka ubaxyada mayblomman.
2. Carruurta waxay soo dejiisanayaan app-ka Majblomman oo waxay iska diiwaangaliyaan koodka kooxda, iyadoo qoraya magaca hore iyo kan dambe
3. Carruurta waxay ku iibin karaan ubaxa majblommor laba siyaabood oo kala duwan:
 - a. Ilmaha oo si caadi ah u qaata boorsada oo u ubaxa iibiya iyo ilmaha oo ku iibka ubaxa websayd u gaar ah isaga. Ku iibinta boorso cagaaran ayaa shuruud u ah inuu qofka mas'uulka ka ah iibka uu ugu dalbado ubaxa kooxda.
 - b. Waa websayd ilmaha u gaar ah oo uu keligii wax ku iibin karo. Websaydka waxa laga hawlgeli karaa markay carruurta iska diiwaangaliyaan appka. Ubaxyada waxaa loogu diraa iibsadayaasha boostada, ilmuhuna ma qaadanayo boorso. Ka akhriso wax badan oo ku saabsan ururinta lacagta bogga majblomman.se.
4. Iibku wuxuu bilaabmayaa **9ka abriil** wuxuuna dhammaanayaa **1da maajo**. Wixii uu ilmuhu iibiyey wuxuu ku soo sheegayaa/xisaabinayaa appka Majblomman. Xisaabta waxa laga soo bilaabayaa **2 maajo ilaa 18 maajo**.
5. Marka la xisaabiyo ka dib, ilmuhu wuxuu helayaa 10%, kooxduna 10% oo ah khidmadii ururintooda. Khidmada ilmaha waxaa loogu soo dirayaa Swish. Lambarka telefoonka ee la rabo in ilmaha khidmada uu shaqaystay loogu soo diro waa inuu ka diiwaangashan yahay appka Majblomman ugu dambayn 18 maajo.

Heshiiska iibsigu wuxuu dhexmarayaa iibsadaha iyo Majblomman. Ilmuhu wuu u dhexeeyaa, sida qofka fadhiya maqalka dukaanka oo kale. Ma jiro wax heshiis ah oo u dhaxaynaya ilmaha iyo iibsadaha. Ilmuhu uma baahna inuu haysto moobil u gaar ah si uu u bilaabo inuu websaydka wax ugu iibiyo, wuxuu u baahan yahay inuu internet helo oo keliya. Iibinta ubaxa majblommor gabi ahaanba waa bilaash.

More info: majblomman.se/vardnadshavare



Qofka mas'uulka ah ayaa ogolaanaya inuu ilmihii iibiyo ama gabo ubaxyada majblommor isaga/iyada ayaan ka mas'uul ah in xisaabinta si sax ah loo soo sameeyo. Buuxi meelaha bannaan oo u gudbi qofka ka mas'uulka ah iibinta ubaxyada majblomman.

Magaca hore ee ilmaha: _____ Magaca dambe ee ilmaha: _____

Iskuulka/ururka: _____ Taariikhda iyo Meesha: _____

Saxiixa: _____ Magaca oo dhammaystiran: _____

Ilmahayga wuu ku iibin karaa ubaxa majblommor boorsada iyo dukaanka websaydka

Ilmahayga wuu ku iibin karaa ubaxa majblommo dukaanka websaydk